44. Mana aannaan ahayn kuwa Quudiya Miskiinka.

وَلَمْ نَكُ نُطْعِمُ الْمِسْكِينَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaana ahayn kuwa la dhumbada kuwa xumaanta Dhumban.

وَكُنَّا نَخُوضُ مَعَ الْخَائِضِينَ ﴿٤٥﴾

46. Waxaana ahayn kuwa beeniya Maalinta Abaalmarinta (Qiyaamada).

وَكُنَّا نُكَذِّبُ بِيَوْمِ الدِّينِ ﴿٤٦﴾

47. Ilaa ay Dhabtu Nooga Timaado (Geeridu).

حَتَّىٰ أَتَانَا الْيَقِينُ ﴿٤٧﴾

48. Ma anfacayso kuwaas Shafeecada kuwa Shafeeca.

فَمَا تَنفَعُهُمْ شَفَاعَةُ الشَّافِعِينَ ﴿٤٨﴾

49. Maxaase u sugnaaday oy waanada uga Jeedsadaan.

فَمَا لَهُمْ عَنِ التَّذْكِرَةِ مُعْرِضِينَ ﴿٤٩﴾

50. ood u moodaa Dameero Diday.

كَأَنَّهُمْ حُمُرٌ مُّسْتَنفِرَةٌ ﴿٥٠﴾

51. oo ka Cararay libaax.

فَرَّتْ مِن قَسْوَرَةٍ ﴿٥١﴾

52. Haddana wuxuu dooni midkasta oo ka mida warqado Qoran (kitaab).

بَلْ يُرِيدُ كُلُّ امْرِئٍ مِّنْهُمْ أَن يُؤْتَىٰ صُحُفًا مُّنَشَّرَةً ﴿٥٢﴾

53. Saas ma aha Ee kama yaabayaan Aakhiro.

كَلَّا ۖ بَل لَّا يَخَافُونَ الْآخِرَةَ ﴿٥٣﴾

54. Waxaa sugan in Quraanku waana yahay.

كَلَّا إِنَّهُ تَذْكِرَةٌ ﴿٥٤﴾

55. Ruuxii Doona yaana waantoobi.

فَمَن شَاءَ ذَكَرَهُ ﴿٥٥﴾

56. Mana Waantoobayaan in Eebe Doona Mooyee, Eebana wuxuu mutaa in laga Dhawrsado, wuxuuna Ehel u yahay inuu Dambi Dhaafo.

وَمَا يَذْكُرُونَ إِلَّا أَن يَشَاءَ اللَّهُ ۚ هُوَ أَهْلُ التَّقْوَىٰ
وَأَهْلُ الْمَغْفِرَةِ ﴿٥٦﴾

Naf walba waxaa laga abaal marin waxay kasbatay, khayr iyo sharba, hase yeeshee ehlu jannuhu waxay waydiin ehlu naarka waxa naarta galiyay, waxayna ugu jawaabi: inayna tukan jirin, miskiinna quudin jirin, xumaantana tiimban jireen, qiyaamadan beenin jireen inta dhabtu uga timaaddo, kuwaas shafeeco wax uma tarto, maxaayeelay Xaqay ka jeedsadeen iyagood mooddo dameero bahal ka cararay, haddana midkastoo ka mida gaalada wuxuu dooni in warqad qoran samada looga soo dajiyo, dhabahaantuse waa inayna aakhiro ka yaabaynin, Quraankuna waana yahay, ruuxii doonana waantoobi, awoodana Eebaha in laga cabsado muta dambi dhaafna ehel u ah yaa iska leh. Al-Muddaththir (38-56).

## Suurat Al-Qiyaamah سُورَةُ الْقِيَامَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaaran maalinta qiyaame.

لَآ أُقۡسِمُ بِيَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ ١

2. Waxaan ku dhaaran (oo kale) nafta Dagaasha (Saaxiibkeed)(Ee waa la idin soo bixin).

وَلَآ أُقۡسِمُ بِٱلنَّفۡسِ ٱللَّوَّامَةِ ٢

3. Ma wuxuu u maleeyay Dadku inaanaan kulminhaynin lafihiisa.

أَيَحۡسَبُ ٱلۡإِنسَٰنُ أَلَّن نَّجۡمَعَ عِظَامَهُۥ ٣

4. Saas ma aha ee waan karraa inaan sinno (soona Celinno) Farihiisa.

بَلَىٰ قَٰدِرِينَ عَلَىٰٓ أَن نُّسَوِّيَ بَنَانَهُۥ ٤

5. Wuxuuse Dooni Dadku inay ka Gaaloobaan waxa ka horreeya.

بَلۡ يُرِيدُ ٱلۡإِنسَٰنُ لِيَفۡجُرَ أَمَامَهُۥ ٥

6. Wuxuu waydiin waa Goorma Maalinta Qiyaame.

يَسۡـَٔلُ أَيَّانَ يَوۡمُ ٱلۡقِيَٰمَةِ ٦

7. Markase Araggu Wareero (Taagmo).

فَإِذَا بَرِقَ ٱلۡبَصَرُ ٧

8. Dayuxuna Madoobaado.

وَخَسَفَ ٱلۡقَمَرُ ٨

9. Lana Kulmiyo Qorraxd iyo Dayaxa.

وَجُمِعَ ٱلشَّمۡسُ وَٱلۡقَمَرُ ٩

10. Wuxuu Dhihi Dadku Maalintaas xagee loo cararaa.

يَقُولُ ٱلۡإِنسَٰنُ يَوۡمَئِذٍ أَيۡنَ ٱلۡمَفَرُّ ١٠

11. Saas ma aha ee ma jiro wax la magan Galo (Eebe Mooyee).

كَلَّا لَا وَزَرَ ١١

12. Xagga Eebahaa yaana Maalintaas loo ahaan.

إِلَىٰ رَبِّكَ يَوۡمَئِذٍ ٱلۡمُسۡتَقَرُّ ١٢

Suuraddan waxaa lagu nagacaabaa suuratul-qiyaame, waxayna ka warrami Qiyaamada iyo sida Eebe dadka u soo kulmin, iyo madax adayga gaalada iyo siday u beenin abaalmarinta, maxayse u tari waxaa iman maalin araggu taagmi, dayuxuna madoobaan, qorraxdana uu la kulmi, dadkuna ay odhan iyagoo calaacali xaggee loo cararaa maanta, dhabtuse waxaan Eebe ahayn oo lamagan galo ma jiro maalintaas xaggiisaana loo ahaan. Al-Qiyaamah (1-12).

---

13. Waxaa looga warrami dadka Maalintaas wuxuu hormarsaday iyo wuxuu Dibmarsaday.

يُنَبَّؤُاْ ٱلۡإِنسَٰنُ يَوۡمَئِذِۭ بِمَا قَدَّمَ وَأَخَّرَ ١٣

14. Ruux walbana Naftiisa isagaa ku maragfuri.

بَلِ ٱلْإِنسَٰنُ عَلَىٰ نَفْسِهِۦ بَصِيرَةٌ ١٤

15. Si kasta Hadduu u cudurdaartana (wax uma tarto).

وَلَوْ أَلْقَىٰ مَعَاذِيرَهُۥ ١٥

16. Ha Dhaqaajinin Nabiyow Carrabka inaad Quraanka ku Dagdagto (Akhriskiisa).

لَا تُحَرِّكْ بِهِۦ لِسَانَكَ لِتَعْجَلَ بِهِۦٓ ١٦

17. Annagaa Laabtaada ku kulmin kuuna Akhriyi.

إِنَّ عَلَيْنَا جَمْعَهُۥ وَقُرْءَانَهُۥ ١٧

18. Ee Markaan akhrino Raac Akhriskiisa.

فَإِذَا قَرَأْنَٰهُ فَٱتَّبِعْ قُرْءَانَهُۥ ١٨

19. Annagaana isasaarray Cadaayntiisa.

ثُمَّ إِنَّ عَلَيْنَا بَيَانَهُۥ ١٩

20. saas ma aha Ee waxaad Jeceshihiin Dadow tan soo Dagdagaysa (Adduunyada).

كَلَّا بَلْ تُحِبُّونَ ٱلْعَاجِلَةَ ٢٠

21. Waxaadna ka tagaysaan aakhiro.

وَتَذَرُونَ ٱلْءَاخِرَةَ ٢١

22. Wajiyaal Maalintaas way ifi.

وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ نَّاضِرَةٌ ٢٢

23. Eebeheedna way Eegi.

إِلَىٰ رَبِّهَا نَاظِرَةٌ ٢٣

24. Wajiyaalna Maalintaas way kaduudsami.

وَوُجُوهٌ يَوْمَئِذٍۭ بَاسِرَةٌ ٢٤

25. Waxayna hubtaa in lugu fali Balaayo.

تَظُنُّ أَن يُفْعَلَ بِهَا فَاقِرَةٌ ٢٥

Eebe wax ka qarsoon ma jiro, cidwalbana wuxuu uga warrami wuxuu falay, ruux walbana isagaa naftiisa ku marag furi, wax cudurdaarana lagama aqbalo, Eebana wuxuu faray Nabigiisa inuusan ku dagdagin akhriska quraanka marka waxyigu ku dagayo, maxaa yeelay Eebaa ballan qaaday inuu Quraanka kulmiyo Nabigana u akhriyo una cadeeyo, waxaase dhaba in dadku ka jeclaaday aakhiraadiise adduunyo (inta Eeba doona mooyee). Maalinta Qiyaamana waxaa loo qaybsami cid faraxsan oo Eeba arki, iyo cid naxsan oo balaayo sugi.(Xasan Al-Bisri wuxuu yidhi Ilaahay bay fiirin, wayna mudataa inay ifto iyadoo Eeba fiirin). Al-Qiyaamah (13-25).

---

26. Saas ma aha ee markay naftu gaadho Dhuunta (Waqtiga Geerida).

كَلَّآ إِذَا بَلَغَتِ ٱلتَّرَاقِىَ ٢٦

27. Oo la Dhoho yaa ku tufi.

وَقِيلَ مَنْ ۜ رَاقٍ ٢٧

28. Oo uu Yaqiinsado inuu Dhiman.

وَظَنَّ أَنَّهُ ٱلْفِرَاقُ ٢٨

29. Oo labada Dhudhun isku marmaan (sakaraad Dartiis).

وَٱلۡتَفَّتِ ٱلسَّاقُ بِٱلسَّاقِ ٢٩

30. Eebahaa Xaggiisaa la aadi.

إِلَىٰ رَبِّكَ يَوۡمَئِذٍ ٱلۡمَسَاقُ ٣٠

31. Mase Rumaynin Gaalku Xaqa mana tukannin.

فَلَا صَدَّقَ وَلَا صَلَّىٰ ٣١

32. Laakiin wuu Beeniyay wuuna Jeedsaday.

وَلَٰكِن كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ٣٢

33. Wuxuuna aaday Ehelkiisii isagoo kibirsan.

ثُمَّ ذَهَبَ إِلَىٰٓ أَهۡلِهِۦ يَتَمَطَّىٰٓ ٣٣

34. Halaag Buuse Mutaa.

أَوۡلَىٰ لَكَ فَأَوۡلَىٰ ٣٤

35. Haddana Halaagbuu Mutaa.

ثُمَّ أَوۡلَىٰ لَكَ فَأَوۡلَىٰٓ ٣٥

36. Ma wuxuu u maleeyay Dadku in looga tagi Bilaash (Dan la'aan).

أَيَحۡسَبُ ٱلۡإِنسَٰنُ أَن يُتۡرَكَ سُدًى ٣٦

37. Miyuusan ahayn Dhibic mani ah oo la Dhibciyo.

أَلَمۡ يَكُ نُطۡفَةٗ مِّن مَّنِيّٖ يُمۡنَىٰ ٣٧

38. Markaas Noqota xinjir oo Eebe Abuuro Ekeeyana.

ثُمَّ كَانَ عَلَقَةٗ فَخَلَقَ فَسَوَّىٰ ٣٨

39. Kana yeelo Labadii Nooc lab iyo Dhaddig.

فَجَعَلَ مِنۡهُ ٱلزَّوۡجَيۡنِ ٱلذَّكَرَ وَٱلۡأُنثَىٰٓ ٣٩

40. Eebaha Saas kara miyuusan Awoodin inuu soo Nooleeyo wixii Dhintay.

أَلَيۡسَ ذَٰلِكَ بِقَٰدِرٍ عَلَىٰٓ أَن يُحۡـِۧيَ ٱلۡمَوۡتَىٰ ٤٠

Geeridu waa xaq, waase arrin daran, wuxuuna Eebe innooga warramay Sakaraadka iyo dhibaatadiisa, iyo inaan qaraabo iyo cidna wax u tari karayn Eeba xaggiisana loo ahaan, taasoy waajibtahay in loo darbado, mase habboona in la maro waddadii Abii-jahal iyo wixii la mid ahaa, een xaqa rumaynin cibaadana falin, balse beeniyay kana jeedsaday kibir iyo islawaynina ehelkiisa ugu dhexnoolaa'halaagbuuse mutaa. miyuusanse Dadku ogayn in waajib laga rabo iyo xaqoo la raaco'iyagoo xusuusan waxa Eebe ka abuuray iyo siduu u ekeeyay Rag iyo Haweenna ka dhigay, taasoo ku tusin awoodda Eebe iyo inuu soo kulmin wixii dhintay si uu u abaal mariyo dhammaantood. Al-Qiyaamah (26-40).

## Suurat Al-Insaan سورة الإنسان